# JAMHUURIYADDA SOOMAALILAND

**XEERKA KAHORTAGA IYO LA DAGAALANKA ARGAGIXISADA XEER LR. __**

**GOLAHA WAKIILADU:**

**ISAGA OO KA DUULAYA**: Qodobka 10(7) ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland kaas oo xaqiijinaya in Jamhuuriyadda Soomaliland ay ka soo horjeedo argagixisnimada iyo falalka kale ee la midka ah, ujeedo kasta ha lahaadeene.

**AQOONSAN**: Xaqiiqda in falalka argagixiso weji kasta oo ay leeyihiin ay khatar ku yihiin xasiloonida Hay'adaha iyo dhaqaalaha Jamhuuriyadda Somaliland, horumarkeeda, isku-xukunka sharciga, dimoqraadiyadda iyo xuquuqda muwadiniinteedu u leeyhiin inay ku nooladaan nabad, xoriyad iy amni;

**OG**: Baahida degdega ah ee loo qabo in la xoojiyo awoodda Somaliland ee ah inay ka hortagto, baadho falalka argagixiso iyo dembiyada kale ee culus, ayna soo hortaagto maxkamadaha ama mastaafuriso, markay ku haboon tahay, dadka shisheeyaha ah ee gala dembiyadaas;

**Garowsan**: Muhiimada in la qaado talaabooyin lagaga hortegayo in dhulka, khayraadka iyo adeegyada maaliyadeed ee dalka ay u isticmaalaan inay ku galaan falal argagixiso:

**TIXGELINAYSA**: Baahida loo qabo in lala kaashado wadamada kale si loo cabudhiyo argagixisada iyo dembiyada kale iyada oo la fulinayo, intii suurta gal ah, heshiisyada caalamiga ah ee Qaramada Midoobay, Afrika, iyo caalamka kale ee la xidhiidha la dagaalanka argagixisada iyo dembiyada kale ee culus ee ay Somaliland saxeexday.

**Waxa uu halkan ku ansixiyey:**

**Xeerka ka hor tagga iyo la dagaalanka argagaxisada Xeer Lr.: __/2014 )**

## QAYBTA I:
## QODOBO GUUD

### Qodobka 1aad: Magaca Xeerka

Xeerkan Waxa Loogu Yeedhayaa Xeerka Ka Hortagga iyo La-dagaalanka Argagixisada, xeer lambar: _____/2014

### Qodobka 2aad: Erey-bixin

Xeerkan gudihiisa, haddii aanu tuduca uu ku jiraa micno kale siinin:-

1) **"Diyaarad"**waxa loola jeedaa walax kasta, oo awoodda in ay ka hesho negaanshiiyaheeda ama socodkeeda hawada, taasina waxay koobsanaysaa wax kasta oo hawada loo fuulo sida buufimooyinka, diyaaradaha shiraaqa leh, diyaaradaha baalaha neg ama leh baalasha dhaq-dhaqaaqa.
2) "**Diyaarad duulimaad ku jirta**"**"** waxaa loola jeedaa diyaarad, xili kasta, laga bilaabo marka dhamaan albaabadeeda dibedda la xidho oo ay bilowdu safarkeeda ilaa marka albaabadaas la furo, marka qasab lagu dejiyo diyaaradda, duulimaadka waxaa laga soo qaadayaa in uu socdo ilaa masuuliyiinta awood u lihi ay gacanta ku dhigaan masuuliyadda diyaaradda iyo dhamaan dadka iyo hantida saaran
3) "**Diyaarad adeeg ku jirta**" waxa loola jeedaa diyaarad laga bilaabo diyaar garawga duulimaadka ka hor ee diyaaradda ee shaqaalaha dhulka ama shaqaalaha duulimaadkaas gaarka ah ilaa laga gaadhayo 24 saacadood ka dib caga-dhigashada diyaaradda; xilliga hawl-galka xaalad kasta ilaa dhamaan xilliga diyaaradu ay ku jirto duulimaadka
4) "**Is-gaadhsiin**" waxa loola jeedaa is-gaadhsiinta/adeegyada lagu helo ama la gudbiyo nidaamka boosaha, telegaraafka, telefoonada, internetka iyo dhamaan nidaamyada kale ee lagu gudbin karo ama lagu heli isgaadhsiin.
5) "**Adeeg is-gaadhsiin bixiye"** waxaa loola jeedaa cid kasta oo bixisa adeeg si loo diro ama loo helo isgaadhsiin.
6) "**Mu'asasad" (entity),** waxaa loola jeedaa qof, koox, shuraako (partnership), shirkad, sanduuq dhaqaale, ama urur ama iskaashi kale oo aan shirkad aheyn.
7) "**Waxyaabaha qarxa ama aaladaha kale ee dilaaga ah** "waxaa loola jeedaa:
    (a) hubka ama aaladaha qarxa ama olola ee u qaabaysan ama awood u leh inay sababaan geeri, dhaawac jidheed oo culus ama waxyeelo maadi oo culus; ama
    (b) hub ama aalad loo qaabeeyey ama awood u leh inay sababto geeri, dhaawac jidheed oo culus ama waxyeelo maadi ah oo culus
8) "**Hay'ad maaliyadeed**" waxa loola jeedaa bangi ganacsi, ama hay'ad kasta oo awood u leh inay bixiso amaah, horumarin lacageed (advance) ama maalgashi, ama u fidisa Dadwaynaha adeegga qabashada lacagaha si ay ugu keydsadaan (saving) ama uga xawishaan.
9) **"Marso taagan"waxaa** loola jeeda jaziirad la sameeyey, dhismo ama heykal si rasmi ah loogu xidhay badda gunteeda oo loogu talo galay sahaminta iyo soosaarida kheyraadka badda guntiisa ama arrimaha kale ee la xidhiidha kobcinta dhaqaalaha.
10) "**Adeegyada kaabayaasha**" **"**waxaa loola jeedaa goobaha ay leeyihiin cid gaar ah amaba cid dawli ah oo caam loo leeyahay oo bixisa ama qaybisa adeeg si danta dadwaynaha ah, sida biyaha, qalabka qashin gurka (sewage), tamarta, shidaalka

ama is-gaadhsiinta, wadooyinka gaadiidka oo ay ku jirto garoomada diyaaradaha, bangiyada adeegyada maaliyadeed iyo manafacyada kale.

11) "Qof si Caalami ah loo xurmeeyo""waxa loola jeedaa:
    a) Madax Qaran (Head of State), kuna jirta gudashada xil Madax Qaran (Head of State) si ku cad dastuurka dalkaas, iyo madaxa dawlad ama Wasiirka Arimaha Dibedda, markasta oo qof caynkaas ahi uu jooga dal shisheeye, iyo sidoo kale xubnaha qoyskiisa ee la socda;
    b) wakiil kasta ama sarkaal Dal ama sarkaal kasta ama wakiil kale ee urur caalami ah ee leh dabeecad is dhexgal dawlado (intergovernmental) kaas oo waqtiga iyo goobta lagu galay dembiga ka dhanka ah, goobtiisa shaqo ee rasmiga ah (official premises), hoyga gaarka ee uu degan yahay ama gaadiid uu leeyahay iyada oo la raacayo xeerka caalamiga ah ee siinaya ilaalin gaar ah ee weerar ka dhan shaqsiyadiisa, xoriyadiisa, sharaftiisa, iyo sidoo kale xubnaha qoyskiisa ee ka mid ka ah guri-joogtiisa

12) "**Rabaanka**" (Master), marka uu la xidhiidho gaadiidka badda, waxaa loola jeedaa hantiilaha ama qofka (marka laga reebo madaxa dekedda ama bayloodka) ee markaas maamulo ama ka taliya gaadiidka badda.

13) **"Caamilka"** (Operator), marka uu la xidhiidho diyaarad, waxaa loola jeedda hantiilaha ama qof markaas ka taliya ama maamula ama gacanta ku haya diyaarad.

14) "**Hanti**" ama "**Maal"** waxa loola jeedaa nooc kasta oo dhigaal (asset), ha ahaado guurto ama ma guurto, mid la taaban karo iyo midaan la taaban karin, si kastaba ha loo helee, dhukumenti sharci ama qoraal wejgii doona leh oo ay ku jirto elektoroni, dijital, cadayn lahaansho ha u noqotee, ama dan lagu leeyahay dhigaalkas, oo ay ku jirto aanse ku koobnayn kaash, dayn baan, jeegag, dadka safarka ku jira (travelers cheques), amar lacageed (money order), saamiyo, damaanaad, sendooyin, jeeg furan , waraaq dayn iyo dayn kasta oo kale qayb, ama dakhli kale ama qiime oo laga helayo ama laga dhaliyey dhigaalkaas ama dhigaal kale.

15) **"Markab ama gaadiid badeed" "ship or vessel"** waxaa loola jeedaa wax kasta oo loo sameeyey ama loogu talo galay inuu ku qaado Dad ama hanti Biyaha badda korkooda.

16) **"mu'aasasad tilmaaman**" waxaa loola jeedaa mu'aasasad kasta oo amar waafaqsan qodobka 4 ee Xeerkan laga soo saaray, ama laga soo qaaday in la sameeyey iyada oo la raacayo hawl-fulinta qodobka 5(2) ee Xeerkan, waqtigaasina dhaqan gal ah.

17) **"Waxyeelo jidh ahaan oo wayn ama khasaare"** waxaa loola jeedaa:
    (a) Dhawaac jidh ahaaneed oo wayn; ama
    (b) Burburin baaxad leh ee goob Dadwaynuhu isticmaalo, tas-hiilaad Qaran ama dawlad, tas-hiilaad kaabe dhaqaale, ama habka gaadiidka dadwayanaha, taas oo sababay dhaqaale lumid wayn; ama
    (c) Qasaare muuqda oo deegaanka ah, oo ay ku jirto hawada, ciida, biyaha, dad iyo xayawanba, ama dhirta iyo bii'ada kale.

18) **"Goobaha Qaran ama dawladeed"** waxa loola jeedaa goobaha joogtada ah ama ku-meel gaadh ah, ama gaadiidka oo ay isticmaalaan ama joogaan si la xidhiidha waajiboodkooda rasmiga ah cidda qaranka matala, xubnaha dawladda, xeer-dejinta ama garsoorka ama saraakiisha ama shaqaalaha Qaranka ama masuuliyad dawladeed oo kale (public authority) ama mu'asasad hey'ad dawladeed, ama shaqaalaha ama saraakiisa urur isku xidha ama ay wadaagaan dawlado.
19) "**Hub**" waxaa ku jira hubka qoryaha dhaca (firearm), hubka qarxa, hubka bayoolajiga ah, kemikaalka ama qumbuliduriyaha ah.
20) "**Qof shisheeye ah**" waxaa loola jeedaa qof aan ahayn muwaadin Jamhuuriyadda Somaliland u dhashay
21) **"kaxayn (transport) "**waxa loola jeedaa bilaabidda, habaynta ama maamulka, gacan ku haynta waxtar ah, oo ay ku jirto awoodda ka go'aan gaadhidda, dhaqdhaqaaqa qof ama alaab nooc kasta ha noqotee

**Qodobka 3[aad]: Fal argagixiso "terrorist Act"**

1. Fal argagixiso waxaa loola jeeda;
(a) Sameynta fal ama ku hanjabidda sameynta falkasta oo si toos ah ugu wajahan mid ama in ka badan falalkan hoos ku qoran, iyadoo ujeedadu tahay in lagu khalkhal-geliyo amaanka Qaranka;-
i) Geeri qof
ii) Waxyeelo wayn oo jidhka qofka ah (serious bodily harm to a person);
iii) Khatar gelin nafta qofka;
iv) Qabsashada ama haynta iyo ku hanjabidda in la dilo, la dhaawaco ama la sii hayo qof kale;
v) Abuuridda khatar culus oo ka dhan ah caafimaadka ama badbaadada Dadwaynaha ama qayb ka mid ah dadwaynaha;
vi) Waxyeelo wayn ama ku hanjabid waxyeelo wayn oo loo geysto hanti guud ama hanti gaar loo leeyahay taas oo ay ku jirto goobaha dadweynuhu isticmaalan, dhisme qaran ama dawladeed, nidaamka gaadiidka dadwaynaha, tas-hiilaadka kaabayaasha dhaqaale ama deegaanka;
vii) Qabsashada diyaarad, markab ama gaadiid badeed ama gaadiid kale noocuu doono ha ahaadee iyadoo loogu hanjabayo in la haysto ama la waxyeeleeyo ama hantida ay sidaan;
viii) Isticmaalidda hubka dhaca ama qaraxyada (using firearms or explosives);
ix) ku sii dayn ama ku hanjabid inuu ku siidayo deegaanka ama qayb ka mid ah ama ku qaybin ama u soo bandhigid (expose) dadwaynaha ama qayb ka mid ah wax khatar ah, dhibaato gaysanaya (haxardous), shacaac leh (radioactive) ama walxo khatar leh (harmful substance); wax kastoo sun kiimiko ah, ama mikrobiyal ah (microbial) ama wax nool saran (biological agent) ama sumeysan.
x) Falal loo qaabeeyey ama loogu talo galay inay jahawareeriyaan nidaamka kambuyuutar, ama bixinta adeegyada si toosa ula xidhiidha tasiilaadka kaabayaasha dhaqaale, is-gaadhsiinta, bangiyada, laamaha maaliyadeed, manfacyada, gaadiidka ama kaabayaal dhaqaale oo kale oo daruuri ah.
xi) Falal loo qaabeeyey ama loogu talo galay inay jahawareeriyan bixinta adeegyada daruuriga ah ee degdegga ah (emergency) sida Booliiska, difaaca ama adeegyada daawo

ama weerarada lagu qaado adeegyadaas;

xii) Falalka loo qaabeeyey ama loogu talo galay carqaladeeyaan, horjoogsadaana hawlgelada militariga Somaliland iyo Ciidamada qalabaysan ama weeraridooda ama ku xad-gudbidda fadhiyadoodda, qalabkooda ama gaadiidkooda,

xiii) Falalka khatarta ku ah amniga Qaranka ama badbaadada Umadda; iyadoo

(b) Falalka sare ku xusan loogu talo galay ama si hufan loogu arki karo in loogu tala galay,

i. In lagu cabsi galiyo Dadwaynaha dhammaan ama qayb ka mid; ama
ii. In lagu khasbo Dawladda ama urur aan dawli ahayn in uu fuliyo hawl ama ka joogsado fulinta hawlihiisa; ama
iii. In lagu abuuro xasillooni darro wayn ama burburin dhameystirnaanta dhul ahaaneed, madax-banaani, midnimo, ama mabaadiida aasaasiga ah ee bulsho, dhaqaale, Dastuur iyo siyaasadeed ah ee Jamhuuriyadda Somaliland; ama
iv. In lagu abuuro xaaladd degdeg ah ama deganaanshiyo la'aan guud, ama kacdoon guud oo dalka ah.
v. Iyadoo loo adeegsanayo ujeedo horumarin arrimo siyaasadeed, afkaareed, diin ama firqo diimeed.

**Qodobka 4[aad]: Koox iyo hantida argagixisnimo (Terrorist Group and Property)**

1) Koox argagixiso waxa loola jeedaa-
    a) Mu'asasad kasta oo leh mid ka mid ah dhaqdhaaqyada (activities) iyo ujeedooyin geysasho, ama fududayn in la fuliyo fal argagixisnimo; ama
    b) Mu'asasad lagu qeexay qaybta labaad ee Xeerkan.

2) Hanti argagixisnimo waxa loola jeedaa-
    a) hanti loogu talo galay in lagu fuliyo fal argagixiso;
    b) Hanti lagu isticmaalay, lagu isticmaalayo, ama ay u eegtahay in lagu isticmaalo fulinta ficil argagaixisnimo;
    c) hanti ay isticmaaleen, ay isticmaalyaan, ama ay u eeg tahay inay isticmaalayaan koox argagixiso ahi;
    d) hanti ay leedahay ama ay maamusho ama loo hayo koox argagixiso; ama
    e) Hanti loo soo ururiyay iyada oo looga gol leeyahay in lagu siiyo taageero koox argagixiso ama lagu maal geliyo koox argagixiso.

## QAYBTA II:
## URURADA LA CAYIMAY/TILMAAMAY
## *SPECIFIED ENTITIES*

**Qodobka 5[aad]: Amarada ku dhawaaqaya mu'asasad sugan inay yihin mu'asasado Tilmaaman**

1. Marka Xeer-ilaaliyaha Guud isagoo ka duulaya sababo caqli-gal ah oo uu ka helay baadhitaan lagu sameeyey mu'asasad looga shakiyey in-
    a) si ku talo-gal ah u fuliyey;iskudiyaariyey inuu fuliyo ; uga qayb galay in la fuliyo fal argagixiso, ama

b) si ku talo-gal ah u samaysay isagoo matalaya, ka amar qaadanaya, ama xidhiidh la leh mu'asasad lagu sheegay farqadda hore ee qodobkan,

Waxa uu ku talo siin karaa Wasiirka Wasaaradda Arimaha Gudaha, kaasi oo la xidhiidha mu'asasad la tilmaamay, inuu ka soo saaro go'aan si wafaqsan farqada (2) ee qodobkan,

2. Hadii Wasiirku uu ku qanco inay jirto cadayn taageeraysa taladaas lagu sameeyey hab waafaqsan farqadda (1) ee qodobkan, waxa uu si amar ah ku shaacinayaa isaga oo marinaya warbaahinta, kuna daabacaya Faafinta Rasmiga ah ee u horaysa, in mu'asasadaas tahay mid tilmaaman.
3. 30 maalmood gudahood marka sida caamka ah loo shaaciyo, mu'asasadka ka la tilmaamay waxaa uu u qoran karaa codsi Wasiirka in uu ka noqdo Amarka uu ku sameeyey habka waafaqsan farqadda (1) ee qodobkan.
4. Ka hor inta aanu ka go'aan gaadhin codsiga lagu sheegay farqadda 3[aad] ee Qodobkan, Wasiirku waa in uu kala tashadaa Xeer-ilaaliyaha Guud ee Qaranka codsiga.
5. Hadii Wasiirku-
   a) go'aansado inay jiraan sababo macquul ah oo uu uga noqdo Amarka, waa in uu ka noqdaa Amarka isaga oo ku dhawaaqaya ka noqoshadaas marinayana war-baahinta kuna soo saaraya daabacaaada u horaysa ee Faafinta Rasmiga ah ee Somaliland.
   b) go'aansado inaanay jirin sabab macquul ah oo uu uga noqdo, waa in uu diidaa codsigaas, waana in uu, shan iyo toban cisho gudohood tan iyo markii ay soo gaadhay codsigu, ku ogaysiiyaa codsadaha go'aankiisa.
6. 30 maalmood gudohood marka uu helo warka la xidhiidha go'aanka lagu sheegay farqadda 5 [aad] ee Qodobkan, codsaduhu waxa uu Maxkamadda Sare u gudbin karaa dib-u-eegis go'aankaas waana inuu u gudbiyaa nuqul codsigaas ah Xeer-ilaaliyaha Guud.
7. marka uu helo codsigaas lagu sheegay farqadda 6[aad] ee qodobkan, Gudoomiyaha Maxkamadda Sare ama Garsooraha Maxkamada Sare ahi:-

   a) waa inuu ku baadho fadhi, wixii warbixin amni ama sirdoon ah ee la xidhiidha talo-bixinta ama samaynta Amarka lagu sheegay farqadda 2[aad] ee Qodobkan ee arimaha codsadaha, waxaana uu dhegaysanayaa wixii cadaymo ah ama war ah (information) ee uu soo bandhigo Xeer-ilaaliyaha Guud, waxana uu dhegaysanayaa dhamaan ama qayb ka mid ah cadaymaha ama warka iyada oo uu maqan yahay codsaduhu ama qareenka metelaya codsadaha, hadii ay la noqoto wuxuu dalban karaa soo bandhigidda warkaasi khatarta gelinayo amniga qaranka ama khatar gelinayo badbaadada qofka.
   b) Guddoomiyuhu waxaa uu heli karaa/qaadi karaa (receive) caddayn ahaan shay kasta (oo ay ku jirto war laga helay dawladda ama laamaha ama hayadaha dalalka shisheeye ama ururada caalamiga ah), taas oo, hadii ay ula muuqato mid lagu kalsoonaan karo oo xidhiidha la leh, waxaa uu ku salayn karaa go'aankiisa caddeyntaas.

8. Xeer-ilaaliyaha Guud waa in uu lixdii bilood ee kastaba dib u eegaa hal mar dhamaan Amarada lagu soo saaray si waafaqsan farqadda (2) ee qodobkan, si uu uga go'aan gaadho inay weli jiraan sababo macquul ah, sida ku xusan farqadda (1) ee qodobkan, in Amarkaasi sii socdo oo uu dhaqan gal ku ahaado Mu'asasadaas la tilmaamay. Hadii uu go'aansado inaanay jirin sababahaas macquulka ahi, waa in uu kula taliyaa Wasiirka dib uga noqoshada Amarka lagu sameeyey si waafaqsan farqadda (2) ee la xidhiidha Mu'asasada la tilmaamay.

**Qodobka 6^aad: Amarada Fulinaya Talaabooyinka Lagu Dhaqan-gelinayo Qaraarada Golaha Amaanka**

1. marka Golaha Amaanka ee Qaramada Midoobay uu go'aansado, isaga oo ka duulaya qodobka 41 ee Cahdiga Qaramada Midoobay, talaabooyin lagu dhaqan gelinayo go'aamadiisa uguna baaqo dawladaha gobolka inay dhaqan geliyaan tallaabooyinkaas, Wasiirka Arimaha Dibadu, isaga oo la tashanaya Wasiirka Arimaha Gudaha, isaga oo Amar ahaan ku daabacayaa Faafinta Rasmiga ah, waxa uu qaadayaa talaabooyinka ula muuqda inay lagama maarmaan u tahay ama ku haboon in awood loo yeesho in talaabooyinkaas laga dhaqan geliyo Somaliland.
2. Marka Amarka lagu sheegay farqadda (1) ee qodobkan, uu ka dhigo qodobada la dhaqan geliyay in ay jiraan sababo macquul ah oo lagu aamino in mu'asasada lagu tilmaamay amarka ay lug ku leedahay dhaqdhaqaaq argagixiso, Mu'aasasadaas waa in loogu dhawaaqo Mu'asasad tilmaaman sida uu dhigayo qodobka 4 ee Xeerkan.

**QAYBTA III**
**ARGAGIXISANIMADA IYO DEMBIYADA LA XIDHIIDHA**
**(Terrorism and Related Offences)**

**Qodobka 7^aad: Ciqaabta Fal argagixiso "Terrorist Act"**

Qof ama koox kasta oo:-

1) Geysta fal argagixiso sida lagu qeexay qodobka 3aad ee Xeerkan waxaa lagu ciqaabaya;-
   a) Dil, haddii falkaasi ay ka dhalato geeri.
   b) Xabsi daa'im, haddii aanay ka dhalan falkaasi natiijada ku xusan xubinta (a) ee isla qodobkan falkaasi argagixiso.
2) Ku qal-qaaliya, fududeeya, maal-geliya ama caawiya in la geysto fal argagixiso, Waxa lagu ciqaabayaa xabsi u dhexeeya 15 sano ilaa 20 sano ama xabsi daa'im.

**Article 8^aad: Qorsheynta iyo Diyaargarowga**

1. Qof kasta oo haysta shay keeni karta shaki macquula in haysashada shaygaasi tahay mid lagu xidhiidhinayo in lagu fuliyey loo diyaariyey ama loo qorsheeyay fal argagixiso, waxa lagu ciqaabayaa ciqaabta u dhaxaysa xadhig dhan 12 ilaa 20 sano.

2. Waxay u tahay difaac qofka lagu soo eedeeyey farqadda hore qodobkan in uu caddeeyo in haysashadaasi shaygu aanay ujeedadeedu ahayn mid la xidhiidha , in lagu fuliyey , loo diyaariyay ama loo qorsheeyey fal argagixiso.

**Qodobka 9aad: War ururin**

1. Qof kasta oo -
   (a) Ururiya ama sameeyo kaydin, oo ay ku jirto kaydin sawiro ama habka danabaysan (elektoroonik), war nooc kasta oo ay tahayba kaas oo ay u eegtahay in loo isticmaali karo qof gelaya ama u diyaargaroobaya fal argagixiso, ama
   (b) Haysta dhukumenti ama kayd, ay ku jiraan war ama xog nooca sare ku xusan oo kale ah; Waxa uu gelayaa dembi waxaana lagu ciqaabayaa xadhig dhan 10 ilaa 20 sano

2. Qofka lagu soo eedeeyay si waafaqsan farqada koowaad ee qodobkan, waxa uu isku difaaci karaa in uu caddeeyo in uu u haysto cudur-daar macquul ah warkaas ururintiisa iyo haysashadiisa.

**Qodobka 10aad: Gacan ku siin iyo ku qalqaalin (aiding and procuring).**

Iyada oo aan loo eegayn qodobada la xidhiidha gacan ku siin iyo ku qalqaalin ee ku tilmaaman xeerka ciqaabta guud, qofkasta oo;

(a) Caawiya ama dhiirigeliya inuu geysto ama isku daya inuu geysto ama

(b) kula taliya ama u fududeeya inuu geysto ama isku dayga inuu geysto dembi argagixiso ama dembi kasta oo kale oo lagu sheegay xeerkan waxaa uu gelay dembi, waxaana lagu ciqaabayaa si la mid ah falka argagixiso ee la xidhiidha ama dembiga kale oo ku xusan xeerkan marka loo eego gacan ku siin, caawin, kula tali, ama ku qalqaalin, ama isku day.

**Qodobka 11aad: Isku dayga fal argagixiso**

Qof kasta oo isku daya, iyada oo la raacayo micnaha qodobka 17aad ee Xeerka Ciqaabta Guud, inuu geysto fal argagixiso ama dambi kale oo lagu sheegay xeerkan, waxa ciqaabtiisa loo raacayaa sida uu jideeyay qodobka 125 ee Xeerka Ciqaabta Guud.

**Qodobka 12 aad: U raadinta iyo In La Siiyo Taageero Koox Argagixiso ama si loo Fuliyo Fal Argagixiso**

Qof kasta oo isaga oo og ama hab kasta; –

(a) ugu raadiya taageero, siiya taageero agab, koox argagixiso ama

(b) ugu raadiya taageero, ama siiya taageero agab oo lagu fuliyo fal argagixiso,

Haddii aanu falkiisu noqon mid halis ah, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi 10 sano ilaa 20 sano ah.

Taageerada marka la fiiriyo faqradda (1) ee qodobkan wax ku jira;-
(a) in la oggolaado in la bixiyo, ama bixinta dokumentiyo safar oo la been abuuray iyada oo dokumentiyadana la siinayo xubin ka tirsan koox argagixiso.
(b) in la oggolaado in la bixiyo, ama bixinta xirfad ama khibrad looga faa'iidaynayo, ama loo jihaynayo ama lala samaynayo koox argagixiso ah.
(c) galidda ama in lagu nagaado wadan si loogu faa'iideeyo ama iyada oo amar laga helayo ama xidhiidh lala leeyahay urur argagixiso ah .

**Qodobka 13aad: Isticmaalka Hanti ama maal si loo Galo Fal Argagixiso**

Qof kasta oo;–

a) u isticmaala hanti ama maal, si toos ah ama si dadban, gabi ahaan ama qayb ahaan, gelidda ama fudaydinta gelidda fal argagixiso; ama
b) Gacanta ku haya hanti ama maal uu ugu talo galay in loo isticmaalo ama og in loo isticmaalayo ama ay jirto sababo macquula oo uu uga shakiyi karayay in loo isticmaalayo, si toos ah ama si dadban, gabi ahaan ama qayb ahanba, iyadoo ujeedadu tahay si loo galo ama loo fududeeyo gelida fal argagixiso:

Waxa uu galay dambi, waxaana lagu ciqaabayaa, hadii aanu falku u dhigmin dembi ka culus mooyee, xabsi dhan 10 sano ilaa 20 sano

**Qodobka 14 aad: Habaynta si loo Hayo ama loo Maamulo Hanti Argagixiso**

Qof kasta oo isagoo og ka mid noqda ama noqda qof ku lug leh, isku-dubarid helidda, ama maamulidda ama u metelidda qof kale hanti argagixiso isagoo qarinaya (concealment), dibadda uga saara, xawila ama si kale ku gudbiya, waxaa uu galay dembi waxaa lagu ciqaabaa xadhig dhan 10 sano ilaa 20 sano.

**Qodobka 15aad: Hoysiin Dad Gelaya Falal Argagixiso**

Qof kasta oo hoy siiya ama qariya, ama ka horjoogsada, ama caqabadeeya, ama faro-geliya qabashada qof kale isaga oo og, ama ay jirto sabab macquul ah oo uu ku ogaado in qofkaas kale;-

a) uu galay ama qorsheenayo ama ay u dhowdahay inuu geysto fal aragagixiso; ama
b) yahay xubin urur argagixiso;

Waxa uu gelay dembi waxaana lagu ciqaabayaa 10 sano ilaa 20 sano oo xadhig ah.

**Qodobka 16aad: U qoridda Dad inay ka mid noqdaan Koox Argagixiso ama inay Ka Qayb galaan Falal Argagixiso**

Qof kasta oo isaga oo og ogolaada inuu is qoro ama is-qora ama qora qof kale-

a) in uu noqdo xubin koox argagixiso; ama
b) ka qaybqaato fal argagixiso,

Waxa uu galay dembi waxaana lagu ciqaabayaa xadhig dhan 10 sano ilaa 20 sano

**Qodobka 17aad: Bixinta Iyo Qaadashada Tababar Argagixiso**

1. Qof kasta oo

    (a) bixiya tababar heerka uu doono ha noqdee oo ay ka mid yihiin;-

        (i) Samaynta ama isticmaalidda aalad qaraxda ama sun
        (ii) Isticmaalka hab kasta ama farsamo kasta iyadoo ujeedadu tahay gelidda ama fududaynta fal argagixiso;
        (iii) Samaynta dhaqdhaqaaq ama tababar ciidan

    (b) Isagoo marka uu samaynayo tilmaamaha ama tababarka, og in qofka la tababarayaa uu u jeedo inuu u isticmaalo xirfadaas lagu tababarayo inuu geysto ama loogu diyaargaroobo fal argagixiso ama ku caawiyo gelidda ama ugu diyaargarowga cid kale falalkaas ama dembiyadaas,

Waxa uu gelayaa dembi waxaana lagu ciqabayaa xadhig dhan 15 sano ilaa 20 sano .

2. Qofkasta oo hela tilmaamaha ama tababarada xirfadaha lagu sheegay farqadda 1aad ee qodobkan isla markaana tilmaamahasi iyo tababarkasi ula jeeda inuu u isticmaalo xirfadaas loo tilmaamay ama lagu tababaray gelida ama u diyaargarowga fal argagixiso ama ku caawiyo gelidda ama diyaargarowga cid kale falkaas,

Waxa uu gelay dembi waxaana lagu ciqaabaya xadhiga dhan 10 ilaa 20 sano

**Qodobka 18aad: dhiirigalinta ama ku boorinta samayn fal argagixiso (incitement or promotion)**

Qof kasta oo isaga oo og-

a) ku dhiirigaliya ama ku booriya samaynta fal argagixiso; ama
b) ku dhiirigaliya ama ku booriya xubinimada koox argagixiso;

Waxa uu gelayaa dembi waxaana lagu ciqaabayaa xadhig dhan 10 sano ila 20 sano.

**Qodobka 19aad: Mu'aamaradda si loo Galo Dembiyada ku cad Xeerkan**

1. heshiis kasta oo ka dhexeeya laba qof iyo wax ka badan ee lagu heshiiyo in la geysto fal argagixiso ama dembi kasta oo kale oo lagu sheegay xeerkan, iyada oo aan waxba loo dhimayn qodobka 76 ee Xeerka Ciqaabta, waxa lagu ciqaabayaa shirqoolid in la galo ficil ama dembi xataa hadii aan ficilkaas ama dembigaas la geysan, waxaa lagu ciqabayaa xadhig dhan 10 sano ilaa 20 sano.
2. qof kasta oo ku shirqoola qof kale dhulka Somaliland si uu uga geysto fal argagixiso meel ka baxsan Somaliland, hadii lagu samayn lahaa Jamhuuriyada Somaliland noqon lahaa dembi ku xusan xeerkan, waxaaa laga soo qaadayaa mid lagu geystay gudaha Jamhuuriyadda Somaliland.
3. qof kasta oo ku shirqoola qof kale meel ka baxsan dhulka Jamhuuriyadda Somaliland si uu uga geysto ficil argagixiso gudaha Somaliland taasoo ku xusan dembiyada xeerkan, waxaa laga soo qaadayaa shirqoolkaas mid ka dhacay gudaha Somaliland.

**Qodobak 20aad: sheegashada xubinimada Kooxo Argagixiso**

1. qof kasta oo ka mid ah ama sheegta in uu ka mid yahay koox argagixiso waxa uu gelayaa dembi waxaa lagu ciqaabayaa 10 sano ilaa 20 sano.

2. waxaa u furan qofka lagu eedeeyey farqadda (1) ee qodobkan inuu cadeeyo in mu'asasada ay eeddu la xidhiidho aanay ahayn koox argagixiso markii uu ka mid noqday xubin, ama uu sheegtay inuu xubin ka yahay mu'asasadaaas ama in aanu ka qayb qaadan dhaqdhaqaaqyada mu'asasadaas intii ay noqdeen kadib koox argagixiso.

## QAYBTA IV
## DEMBIYADDA KALE EE AMAANKA HALISTA KU AH

**Qodobka 21aad: Af-duubidda Diyaaradaha**

1- Iyadoo aan waxba loo dhimayn Qodobka 3aad ee Xeerkan, qof kasta oo saaran diyaarad duulimad ku jirta oo qabsada ama gacanta ku dhiga maamulkeeda si xoog ah, hanjabaad ama nooc kasta oo cabsi gelin ah, isagoo doonaya in la siiyo madax furasho dhaqaale, ama siyaasad ahaan uga faa'ideysanaya taasoo ka soo horjeeda maslaxaada guud ee Qaranka JSL, waxaa lagu ciqaabaya xadhig dhan 15 ilaa 20 sano.

2- Qofkasta oo ku gacansiiya fulinta afduubkaas, waxaa lagu ciqaabayaa xadhig u dhaxeeya 10 ilaa 15 sano.

**Qodobka 22aad: Dembiyda ka dhan ka ah Amaanka Duulista Hawada**

1. Qof kasta oo gala ficiladan soo socda, waxaa lagu ciqaabayaa 5 ilaa 20 sano;-

(a) fal rabshad (gacan ka hadal) wata oo ka dhan ah qof saaran diyaarad duulimad ku jirta, hadii fal kaasi uu khatar u geysan karo amaanka diyaaradda;

(b) Burburinta diyaarad adeeg ku jirta, ama ku sababidda khasaare diyaarad taas oo ka dhigata diyaaradda mid aan awood u lahayn inay duusho ama khatar gelin karaa amaanka dulimaadkeeda;

(c) dhigid ama sababid in la dhigo diyaarad adeeg ku jirta, habkay doonto ha noqotee, aalad ama walax taas oo burburin karta diyaaradaas, ama ku sababi karta qasaare ka dhigi kara mid aan awood u lahayn inay duusho, ama sababta qasaare khatar gelin kara amaanka duulimaadkeeda;

(d) burburiya ama qasaare u gaysta tas-hiiladka marista hawada (air navigation) ama faro-geliya hawl-galkooda, hadii falkaasi uu khatar gelin karo amaanka duulimaadka diyaaradda;

(e) gudbiya war uu ogyahay qofkaasi inuu yahay been, taas oo dabaded khatar gelinaya amaanka duulimadka diyaaradda.

2. qof kasta oo ku hanjaba, isagoo uga dan leh inuu ku qasbo qof dabiici ah ama aan ahayn inuu sameeyo ama ka joogsado ficil, inuu galo dembiyada lagu xusay farqadaha 1(a), 1(b), or 1(d), hadii hanjabaadas ay khatar gelin karto amaanka diyaarada, hadii aan falkaasi u dhigmin fal argagixiso, waxaa lagu ciqaabaya xadhig inta u dhaxaysa 10 sano ilaa

25 sano.

**Qodobka 23aad: Dembiyada ka Dhanka ah Garoomada Diyaaradaha ee u Adeegaya duulista hawada**

1. qof kasta oo gala mid ka mid ah ficiladan soo socda, isaga oo isticmalaya aalad, walxo (substance) ama hub, hadii ficilkasi uu khatar gelin karo amaanka garoon diyaaradeed oo duulis hawadeed oo caalami ah (international aviation):
(a) fal rabshad ah oo ka dhan ah qof jooga garoon diyaaradeed oo u adeegaya duulimaad caalami ah, kaas oo ku sababa ama ku sababi kara dhaawac halis ah ama geeri;
(b) burburinta ama khasaare wayn u gaysta tas-hiilaadka garoon diyaaradeed oo u adeegaya duulimaad caalami ah ama diyaarad aan adeeg ku jirin oo meesha taal ama jaha wareeriya adeega garoonka diyaaradaha, waxaa lagu ciqaabaya xadhig u dhaxeeya 20 ilaa 24 sano ama xabsi daa'im.
2. qof kasta oo ku hanjaba, isagoo uga gol leh inuu ku qasbo qof dabiici ah ama aan dabiici ahayn, inuu sameeyo ama ka joogsado samaynta waajib saaran, si uu u galo mid ka mid ah dembiyada ku xusan farqadda (1) ee qodobkan, hadii hanjabaadasi ay khatar gelin karto amaanka garoonka diyaaradeed, hadii an falkaasi u dhimin fal argagxisio, waxaaa lagu ciqaabaya 10 ilaa 25 sano oo xadhig ah.

**Qodobka 24aad: Isticmaalka Alaabta iyo Aaladaha Raadiyoaktifka/nukliyeerka**
1. qof kasta oo isagoon haysan ogolaansho sharci ah hela, gacanta ku haya, gudbiya, bedela, ama dhiga, alaab radiyooaktif/nukliyeer ama haysta aalad:
a) isagoo ula jeedda inuu ku sababo geeri ama dhaawac halis ah; ama waxyeelo wayn oo hanti ama deegaan;
b) ama ku sababa ama ku sababi kara geeri ama dhaawac culus qof ama waxyeelo wayn oo hantiyeed ama deegaan, waxaa lagu ciqaabaa 20 ilaa 24 sano oo xadhig ah.
2. qof kasta oo gala:
a) tuugo ama dhac alaab raadiyooaktif/nukliyeer; ama
b) lunsi ama ku helid hab khiyaano ah alaab raadiyooaktif/nukliyeer; ama
c) fal u dhigma qaadida, diridda, ama dhaqajinta alaab raadioaktif iyada oo la gelinayo ama lagu saarayo dalka si aan sharci ahayn,ama
d) dalbid alaab raadiyoaktif/nukliyeer ama aalad si hanjabaad ah, ama isticmaalidda xoog, ama hab kale oo cabsi gelin ah, waxaa lagu ciqaabayaa xadhig dhan 10 ilaa 20 sano.

**Article 25aad: Dembiyada ka Dhanka ah Dadka Caalami ahaan la xushmeeyo (Offences against internationally protected persons)**

1. qof kasta oo gala mid ka mid ah ficiladan soo socda:
a) af-duub, ama ku qaadida weerar xoriyadda ama nafta qof caalamiyan la ilaaliyay;
b) ku qaadida weerar goobta, deegaanka gaarka ah ama habka gaadiidka ee qof caalami ahaan la ilaaliyay ama khatar gelinta qofkaas ama xoriyaddiisa, waxaa lagu ciqaabaya xadhig dhan 20 sano ilaa 24 sano.
c) haddii falkaasi lagu tilmaamay qaybta hore ay ka dhalato geeri, waxaa lagu ciqaabaya

dil.

### Qodobka 26[aad]: Afduubka iyo Qabsashada Gaadiidka dhulka

iyada oo aan waxba loo dhimay qodobka 3aad ee xeerkan:
(a) qof kasta oo qabsada ama haya, ku hanjaba inuu dilayo, dhaawacayo ama sii haynayo qof kale, ama
(b) qabsada ama gacanta ku dhiga maamulka gaadhi alaab ama dad ha saarnaado ama ayaanu saarnaane si uu ugu qasbo cid sadexaad, ha ahaado qof dabiici ah ama koox dad ah, inay sameeyaan ama ka joogsadaan samaynta ficil iyadoo ah shuruud cad ama dahsoon looga dhigay siidaynta qofka la haysto (afduuban) ama gaadiidka ama alaabta saaran waa in, hadii aan falkaasu u dhigmin fal argagixiso, waxaa lagu ciqabayaa xadhig dhan 15 sano ilaa 20 sano.

### Qodobka 27[aad]: Ciqaabta

1. marka laga go'aan gaadhayo ciqaabta ku haboon ee dembi lagu sheegay xeerkan, maxkamada waa in ay tixgelisaa culayska dembiga iyo qodobada la xidhiidha dabaqaadda iyo wax-ka-bedelka ciqaabta ee ku xusan buugga koowaad qaybta afraad ee Xeerka Ciqaabta ilaa inta ay la socon karaan qodobada xeerkan
2. qodobda 71 ilaa 75 ee Xeerka Ciqaabta ee la xidhiidha ka qayb qaadashada dembi ee in ka badan hal qof waa in lagu dabaqaa, marka ay la taxaluqdo, falalka argagixiso iyo dhamaan dembiyada kale ee lagu sheegay xeerkan.
3. Qodobada 126 ilaa 135 ee Xeerka Ciqaabta Guud ayaa lagu dabaqayaa, marka ay la xidhiidhaan, ciqaabta dambiyada ka badan hal dambi ee xeerkan ku xusan ee u geysto hal Eedeysane isla mar keli ah.

## QAYBTA V
## BAADHIDDA DEMBIYADA

### Qodobka 28 [aad]: Awoodaha Xadhigga

1. Sarkaal kasta oo Booliis ah waxa uu qaban karaa isaga oo aan wadan amar qabasho maxkamadeed qof kasta oo geystay ama geysanaaya ama la hayo asbaabo macquul ah oo looga shakiyo in uu galay dembi ama inuu gelayo dembi ku xusan xeerkan.
2. Qofka la xidhay si waafaqsan farqada sare ee qodobkan, waa in lagu hor-geeyaa maxkamada awoodda u leh ama maxkamada ugu dhaw goobta xadhiga mudo dhan 48 saacadood gudahood oo ka bilaabanta marka la soo qabto. Hasayeshee mudadaasi waxaan ku jirin wakhtiga macquulka ah ee ay qaadan karto safarka lagu gaynayo maxkamada.
3. Sarkaalka Booliska ah ee hor-gaynaya qofka xidhan maxkamadu waa inuu sidoo kale diyaariyaa una gudbiyaa maxkamada warbixin kooban oo muujinaysa:

   a) Dhacdada kiiska iyo sababta xadhiga,

   b) Warbixinta iyo xogta cadaymaha la helay:
   c) Hadii ay suuragal tahay, xogta shaqsi ee:
      i) Qofka la xidhay,
      ii) Cida wax ku noqotay ama dhibanaha, iyo
      iii) Cid kasta oo haysa warbixin la xidhiidha xaaladda dambiga.

4. Tallaabo kasta oo uu qaato Garsooruhu si waafaqsan farqadaha qodobkan waa in uu si dhakhso ah ku war-galiyaa sarkaalka Booliska ah ee horgeeyay qofka xidhan Garsooraha, sidoo kale waa inuu wargeliyaa
   a) Xafiiska Xeer-ilaalinta, iyo
   b) Maxkamada awoodda u leh, hadii aan qofka xidhan la horgayn Maxkamadaasi.

**Qodobka 29[aad]: Amarka iyo mudada xabsi ku-haynta (remand and detention orders)**

1) Maxkamada la horgeeyay qofka xidhan si waafaqsan qodobka 28[aad] ee xeerkan, waxay bixin kartaa amar ah xabsi ku-hayn mudada baadhista dacwadda Eedeysanaha.
2) Maxkamadda awooda u leh waxay awood u siin kartaa xabsi-ku-hayntaasi si loo sameeyo baadhis marka uu soo codsado Sarkaalka madaxa u ah baadhista hadii ay ku qanacdo;
   a) in ay jirto sabab macquul ah oo lagu rumaysan karo in xabsi-ku-hayntaasi ay tahay laga maraan si loo helo cadaymo la xidhiidha: iyo
   b) In baadhista ku saabsan qofka la xidhay loo fuliyo si taxadir leh oo dhamaystiran.
3) Muddo kasta oo la amro xabsi ku-haynta Eedaysanaha si loo baadho waa 14 cisho (afar iyo toban cisho) ugu badnaan: laakiin si kastaba mudooyinkaasi isu-gayntoodu waa inaanay ka badan 90 maalmood
4) Hadii baadhidu ku dhamaan waydo mudada la siiyay, sarkaalka baadhista Boolisku waxaa uu ka codsan karaa Maxkamada mudo ku filan oo uu ku dhameeyo baadhista.
5) Maxkamada awooda u leh waxay uu siidayn kartaa qofkasta oo lagu sheegay amarka xabsi ku-haynta qodobkan haddii:
   a) Aanay jirin sababo macquula oo lagu rumaysan karo in Eedaysanuhu galay ama isku dayay galida ama ku lug leeyahay dambi ku xusan xeerkan, ama
   b) Aanay jirin dacwad lagu oogay Eedaysanaha oo ah dambi ku xusan xeerkan mudo 90 maalmood ah oo ka bilaabanta maalinta Maxkamadu amartay xabsi ku-haynta
   c) Codsiga mudo kordhinta xabsi ku-haynta ee mudo 90 cisho oo kale waxa loo soo samayn karaa si waafaqsan qodobka 47aad ee habka xeerka ciqaabta iyadoo lagu dari karo oo kaliya 90 cisho oo kale.

**Qodobka 30 [aad] Qaadista sawirka faraha iyo calaamadaha:**

1. Sarkaalkasta oo Boolis ah ayaa ka qaadi Kara qofka la xidho calamadahan soo socda kadib marka uu ogolaado Eedaysanuhu iyadoo la diwaan galinayo ogolaanshihiisa:

    a) Sawirada faraha ama muuqaalka jidhka sida cagahiisa, amaba jidhka qaybihiisa kale.
    b) Muunadda timaha marka laga reebo timaha qaan gaadhka
    c) Calaamad laga qaaday cidiyaha ama cidiyaha hoostooda
    d) Candhuuf laga qaaday afka
    e) Candhuufta laga qaaday qayb ka mid jidhka taas oon loo tix galinayn qaybaha gaarka ah ee jidhka.
2. Marka qofka la xidhay uu yahay 15 jir ama uu ka yaryahay, ogalaanshuhu waa inuu ka yimadaa waalidka ama qof sharciyan uga masuula ah.

3. Hadii qofka xidhani uu diido in laga qaado mid ka mid ah calaamadaha ku xusan farqada 1[aad] ee qodobkan, sarkaalka masuulka ka ah baadhistu waxaa uu awood u leeyahay in uu ka qaado calaamadahaasi ogolaansho la'aan, hadii uu ku qanco in qaadista calaamaduhu ay lagama maarmaan u tahay cadaynta ama burinta in Eedaysanuhu ku lug leeyahay dembi ku xusan xeerkan. Awooda amarka noocan ah waa in lagu bixiyaa qoraal.

4. Qofka la xidhay waa in lagu wargeliyaa awoodan sababta loo isticmaalay iyo in cadaynta la helay in loo isticmaali karo ujeedada baadhista dembiga oo kaliya.

5. Calaamadahan soo socda waxaa laga qaadi karaa qof la xidhay iyadoo lagu qaadayo raali ahaanshaha qofka xidhan; Lana raacayo farqada labaad ee kor ku xusan.

    a) Calaamad kasta oo dhiig, unug, dheecaan, ama timaha qaan gaadhka ah.
    b) Dheecaan kasta oo laga qaaday dibnaha ama afka qayb ka mid ah.
    c) Dheecaan kasta oo laga qaaday qayb kasta oo jiidhka ka mid ah taas oo macquul ahaan loo tixgalinayo qaybaha khaaska ah ee jidhka.
    d) Kaadida
    e) Muqaalka illkaha
6. Calaamad kasta oo lagu xusay faqrada 5[aad] ee xarafka (a) ilaa (c) waxa qaadi kara xirfadle caafimaad oo loo awood siiyay.
7. Sarkaal kasta oo Boolis ah ayaa qaadi kara calamadaha lagu sheegay faqrada 5[aad] ee xarafka (d) iyo (e).

8. Marka uu qofku diido in laga qaado calamadaha ku xusan faqrada 5[aad] ee qodobkan sabab la'aan, waddista dacwadaas lidiga ku ah qofkaas ee Maxkamadda ka furan, maxkamdu
    a) Si ay u go'aamiso in ay dacwad lid ku ah eedaysanuhu jirto waxay kala dhex-baxaysaa diidmadaasi sida ay ugu muuqato, iyo.

b) Si ay u go'aamiso in eedaysanuhu yahay dambiile galay dambiga lagu soo eedeeyay, waxay kala dhexbaxaysaa diidmadaasi sida ay ugu muuqato.

1. Sawir kasta ama calaamad kasta oo lagu qaaday si wafaqsan qodobkan iyo warbixin kasta oo laga helay calaamadahan, waa la hayn karaa. Laakin looma isticmaali karo qofnaba waxan ka ahayn baadhista dembiga argagixisada ama Ujeedo la xidhiidha ka hor taga iyo baadhista ama oogista dambiyada.

**Qodobka 31 [aad] : AWOODAHA DHEXGALKA (INTERCEPT POWERS).**

1- Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolku wuxuu amri karaa in loo ogolaado Baadhis iyo dabagal socda in cidda ay khuseyso laga qaado talaaboyinka;-

a) In dhexgal lagu sameeyo inta uu socdo xidhiidhka loo adeegsanayo adeegga Boostada ama.

b) nidaam isgaadhsiineed.

2- Guddoomiyaha Maxkamaddu ma bixin karo oggolaanshahaas haddii aanu aaminsanayn:

a) in oggolaanshuhu uu dan u yahay amniga Qaranka ama loo adeegsanayo ka hortagga ama ogaanshaha dambiyo halis ah ama ujeeddo ah in la ilaaliyo dhaqaalaha Somaliland iyo

b) Waxa lagu amray oggolaanshuhu waa in uu noqdo mid u qalma wixii la rabay in lagu gaadho.

c) Wixii war ama xog ah ee laga helo dhexgalkaas ee la xidhiidha waxyaabaha u qarsoodiga ah qofka shaqsi ahaan (confidential personal information) waxay ahaanayaan kuwo dhawrsan oo aan la fidin Karin.

3. Oggolaansho dhexgalka waxaa lagu bixin karaa marka uu Taliyaha Boolisku soo codsado baadhista dembi oo socota awgeed

4. Codsiga waa in lagu qeexo;

a) tilmaanta xidhiidhka la rabo in dhexgalka lagu sameeyo, faahfaahinta cidda adeega isgaadhsiinta bixisa iyo sida hawlgalku uu suuragal u yahay;

b) sharaxaad ku saabsan sababta dhexgalku muhiim u yahay.

c) haddii codsigu degdeg yahay, waa in ay la socotaa wixii caddeymo ah ee kaabaya deg degaasi.

5. Haddii nuqul oggolaanshahaas ah loo geeyo qofka ku xusan oggolaanshaha, qofkaas nuqul isla oggolaanshaas ah waxa uu u gayn karaa cidda la is leeyahay gacan ayay ka gaysan karaan arrinta.

6. Waxa ay noqonaysaa mas'uuliyadda qofka in uu qaado tallaabooyin lagu dhaqan galinayo oggolaansho hadba sidii suuragal ugu ah.

7. amarka dhexgalka ee uu bixiyey Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolku wuxuu ahaanayaa mid taagan mudo cayiman oo la xidhiidha hadba baahida loo qabo si looga bogto baadhista. Guddoomiyaha Maxkamaddu waa inuu dib u eegis ku sameeyaa markii la joogo 90 (sagaashan) cisho.

8. Adeeg bixiyayaasha waxa looga baahan yahay in ay gacansiiyaan saraakiisha sharci-fulinta iyo in ay u ogolaadaan taageero farsamo siin marka saraakiishu la timaado amarka ogolaanshaha, iyada oo la eegayo xeerkan.

9. Kuwa adeega Isgaadhsiinta bixiyaa ma sheegi karaan in Dawladdu dhageysato xidhiidhka wada hadalada Isgaadhsiinta.

**Qodobka 32 aad XUURAAN QARSOODI AH**

1." Xuuraanka qarsoodiga ah ama elegtroonigga ah" waxa lagu qeexaa qof ama koox dad ah oo lala socdo ama loo dhagaysto sheekadooda qaab qarsoodi ah muddo cayiman iyada oo dhagaysigana lagu fulinayo qalab oo ay Saraakiili samaynayso, waana in ay sidaa oggolaato maxkamad awood u leh iyada oo la waafajinayo xeerka marka dhagaysigaa lagu samaynayo goobo gaar loo leeyahay iyada oo la adeegsanayo qalab ama dad; marka la eegayo xisaabaha baananka iyo qoraalada iyo dhokumantiyada kale ee maaliyadeed ama la socodka shabakadaha kombuyuutarada .

2. Boolisku waxay adeegsan karaan " xuuraan qarsoodi ah ama mid elegtroonig ah" si ay ugu uruuriyaan cadaymo baarista dambiyo marka la eego xeerkan ama xeer kaleba oo si cad loo tixraacay.

3. Hawlaha sida cad loo oggolyahay marka la eego xeerarkani waa:

a) duubista sheekooyinka goobaha caamka ah ama goobaha gaarka loo leeyahay;

b) in la sameeyo xuuraan guurguuraya ama mid negi iyada oo la adeegsanayo ama aan la adeegsanayn qalab elegtroonig ah ama qalab wax lagu sawiro;

4) Dhamaan hawlaha kor ku xusan waa in oggolaasho looga helo Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka; kadib marka uu dalbado codsi Xeer Ilaaliyaha Guud. Codsiga waa in si cad loogu codsado oggolaansho in si qarsoodi ah loo galo goobo gaar loo leeyahay. Codsigu waa in uu sidoo kale sheego in dhegaysi kasta oo lagu samaynayo wada-hadalo

dad dhex marayaa uu yahay mid xidhiidh la leh fal dambiyeed marka la eego xeerkan iyada oo isla markaana dhegaysiga la joojinayo marka hadalka la dhegaysanayaa isu rogo arrimo aan dambi ahayn.

5. hawlaha kor ku xusan waxaa la ogolaan kara haddii Maxkamadu ku qanacdo inay jiraan sababo adag oo lagu kalsoonan karo in haddii aan la ogolaan in talaabadaas la qaado aan dembiga baadhistiisa lagu guulaysan Karin.

6. codsi kastaa , haddii la aqbalo,  waxa uu oggolaanayaa tallaabooyinka ku cad qodobka 3aad ee kore muddo aan ka badnayn 90 cisho.

7. codsi lagu dheeraynayo oggolaanshaha ayaa qoraal lagu samayn karaa ka hor inta aanay dhammaan mudada codsigii hore iyada oo haddii la oggolaadana aanu dhaafi karin muddo 90 cisho ah oo dheeraad ah.

8(1) . codsi kale oo lagu sii dheeraynayo mudada lama aqbali doono muddo ka dheeraad ah 180 ka cisho ee oggolaanshaha hore.

(2) haddii loo baahdo baadhis ka dheeraad ah mudada kor ku xusan, codsi cusub ayay tahay in loo sameeyo iyada oo la keen caddaynta cusub ee lagu helay oggolaanshihii hore ee lagu sababaynayo in baadhis dheeraad ah lasii sameeyo. Codsiga caynkaas ah waxa la oggolaan karaa muddo aan ka badnayn 90 cisho haddii kalena ilaa inta lagu soo qabanaayo Eedeysanaha.

9. Oggolaanshaha maxkamadi bixinaysaa waa in uu qeexo:

a) faldambiyeedka ama nooca faldambiyeedka la baadhayo:
b) qofka ama dadka sheekadooda la dhagaysanayo
c) agabka (i.e ciwaanka, kombuyuutar iwm), haddii hore loo adeegsaday agabka, adeegsiga mustaqbalka ee suuro galka ah iyo mudada la rabo in la dhagaysto.
d) In la socod kasta oo lagu samaynayo wada-sheekeysiyo (wada-hadallo) ay yihiin kaliya qaar xidhiidh la leh fal dambiyeed lana joojinayo marka hadalku isku rogo mid aan fal-dambiyeed xidhiidh la lahayn.

10. Maxkamaddu, marka ay bixiso oggolaanshaha codsiga ku sugan qaybtan, waxa ay oggolaanaysaa in si qarsoodi ah ay u galaan saraakiisha Boolisku goob la degan yahay, ganacsiyo, xafiisyo, gaadiid iyo goob kasta oo gaar loo leeyahay oo wada sheekaysiyo fal-dambiyeed xidhiidh la lihi ka dhici karaan si loogu rakibo qalab wax lagu dhegaysto iyo/ama qalab xuuraan iyo si dayac tir loogu sameeyo qalabka ama loo sameeyo hagaajin farsamo oo joogto ah lagu sameeyo isla qalabkaas.

11. Caddaynta si *qumman* loogu helay iyada oo la adeegsanayo hababka xuuraanka qarsoodiga ah oo lagu samaynayo isgaarsiimaha elegtrooniga ah ama iyada oo la adeegsanayo dad war soo uruuriya iyo hawl galada qarsoodiga ah ee ku jira cutubkani

waxa ay noqonayaan qaar loo adeegsan karo dhammaan tallaabooyinka la socodka, baadhista iyo maxkamadaynta.

12. Xogta la helay waa lala wadaagi karaa dowladaha shisheeye haddii heshiis iskaashi la Somaliland la leedahay, gaar ahaan goorta xogtaasi muujinayso halis “ dhab ah ama suuragal ah” oo ku soo fool leh dalkaas shisheeye marka sidaa oggolaansho looga helo Wasiirka Arrimaha Gudaha.

13. Isticmaalka awoodaha ku xusan Qodobka iyo Qodobka hore Hay’adda Sirdoonka Qaranku waxay adeegsanaysaa sida uu tilmaamayo Xeer lam.59/2012, ee Xeerka Sirdoonka Qaranka.

**0Qodobka 33aad: Baadhista Xogta Isgaadhsiinta.**

Xaaladaha ka duwan dhexgalka ama xuuraanka qarsoodiga ah ee lagu tilmaamay labada qodob ee hore, marka Ciidanka Boolisku gacanta ku hayo baadhista faldembiyeed ee ay lagama maarmaan noqoto in la helo xog raadraac Isgaadhsiineed; Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranku wuxuu ku amri karaa shirkadaha Isgaadhsiinta inay xogta ku haboon siiyaan dembi baadhayaasha Ciidanka Booliska.

## QAYBTA VI
## AWOODA DACWAD QAADISTA

**Qodobka 34aad: Awooda Maxkamadaha Somaliland.**

1. Maxkamadaha jamhuuriyada Somaliland ayaa leh awooda qaadista dacwadaha dambiyada ku xusan xeerkan haddii ay ka dhacaan:
    a) Dhulka jamhuuriyada Somaliland, ama
    b) Gudaha diyaarad ama laga galay diyaarad ka diiwaan gashan jamhuuriyada Somaliland, ama markab ku gooshaya calanka jamhuuriyada Somaliland, ama qalab lagu rikibay biyo badeedyada (contiguous or exclusive economic zone) jamhuuriyada Somaliland. Ama
    c) Gudaha diyaarad ama lagula kacay diyaarad lasoo kiraystay oo xarunteeda maamulka ganacsi, ama fadhigeeda rasmiga ahi ku yaalo Jamhuuriyada Somaliland.
2. Maxkamadaha jamhuuriyada Somaliland waxa kale oo ay awood u leeyihiin qaadista dacwadaha dambiyada ku xusan xeerkan ee ka dhaca meel ka baxsan dhulka jamhuuriyada Somaliland haddii:
    a) Dambiga uu galay muwaadin u dhashay jamhuuriyada Somaliland. Ama,
    b) Eedaysanaha dambigu ku sugan yahay dhulka jamhuuriyada Somaliland, hadii aan loo celin eedaysanaha dal kale oo codsada in loo mastaafuriyo sababo dambigaa la xidhiidha. Ama,

c) Dambiga laga galo diyaarad sida afduubka diyaaradaha ama dambiyada liddiga ku ah duulista hawada; dambigaasina ka dhacay gudaha diyaarada hadii ay soo caga dhigato dhulka Somaliland isla markaana dambiiluhu ku sugan yahay gudaha diyaaradaasi. Ama,

d) Dembiyada falal argagixiso ee ka dhaca gaadiidka badda dushooda oo ku sugan biyaha badda Somaliland ama afduub iyo qabashada gaadiidka.

e) Dambiyada ku xusan xeerkan sida (dambiyada ka dhanka ah dadka leh dhawr-sanaan ama xasaanad heer caalami), dambiyadaasi oo laga galay dadkaasi sababo la xidhiidha hawlaha ay fulinayaan iyagoo matalaya xukuuumada Somaliland.

3. Iyada oo aan la tix-galinayn qodobada 5aad ee habka xeerka ciqaabta iyo 12aad ee xeerka nidaamka garsoorka, guddoomiyaha Maxkamada Sare ayaa u magacaabaya Maxkamad Gobol oo u dhaw xabsi ammaan sugan leh iyada oo aan loo eegayn Goobta uu dambigaasi ka dhacay.
4. Hadii dambiyada ku xusan xeerkan ama mawduucyo (elements) ka mid ahi ka dhacaan goob ka baxsan jamhuuriyada Somaliland, qaybta tashiga ee maxkamada gobolka Hargeisa ayaa leh awooda dacwad qaadista dambigaasi.

**Qodobka 35[aad]: Cadaynta Shahaado (Evidence by Certificate)**

1) iyada oo aan la tix-galinayn qodobka 161 ee Xeerka Habka Ciqaabta (ee la xidhidha khabiirka), marka dhegaysiga dacwad kasta ee dembi ku cad xeerkan, su'aali ka dhalato in shay ama walax (substance) uu yahay hub, shay waxyeelo leh, raadiyo aktif, shay dhibaato leh, kimiko sun ah, ama microbial ama shay ama sun bayoologi, shahaaado ay saxeexday hay'ad ama hay'ado ku haboon oo sheegaysa in shaygaasi ama walaxdaasi lagu sheegay shahaadadu uu yahay hub, shay waxyeelo leh, raadiyo aktif, shay dhibaato leh, kimiko sun ah, ama microbial ama shay ama sun bayoologi, waxaa loo qadanayaa cadayn la aqbali karo iyada oo aan u baahanyn cadaynta saxeexa mas'uul ama in qofkaasi saxeexay hor yimaado maxkamadda, waana in, hadii aanay jrin caddeyn ka soo horjeedda, waxaa loo tixgelinayaa caddayn ku filan waxa ay sheegtay.
2) Hay'ad ama hay'ado ku haboon waxa lagu qeexi doonaa Xeer-nidaamiye.

**Qodobka 36 [aad]In la oggolaado caddaymaha elegtroonikada ah iyo hababka casriga ah**

1.) Caddaynta elegtroonikada ah iyo hababka baadhista waa la oggolyahay in loo soo bandhigo caddayn ahaan iyada oo shuruudduna tahay in garsooruhu ku qanco caddayn-nimada maragga lagu caddeeyey hubin ama tasdiiqin af ah ama qoraal ah oo laga helayo qof aqoon toos ah u leh qaabka caddayntaa lagu abuuray ama markhaati loo tixgaliyo in uu khabiir ku yahay takhasuskiisa.

2) 'maragyada elegtroonikada ah' waxa ku jira sawirro; rikoodho lagu sameeyey

kombuyuutaro kuwaas oo aan u baahnayn in qof wax ku daro xogta la rikoodh gareeyo marka laga tago diyaarinta barnaamijka, rakibaadda iyo dayactirka qalabka; rikoodhada muuqaalka ah iyo kuwa maqalka ah; soo dejinta ( down loads) lagu sameeyey telefoonada gacanta iyo qalabkakale ee wargaarsiinta.

3) "hababka baadhista' waxa ku jira kumase koobna oo kaliya lafagurka sawirka faraha (Fingerprint analysis), lafagurka hiddasidaha; goobta uu yaallo teleefanka gacanta; lafagurka maqal iyo muuqalka ah; baadhista goobta dambigu ka dhacay; baadhista sawirada la xidhiidha; lafagurka calaamadaha qoryaha gacanta iyo qalabka; lafagurka gumacyada; baadhista maydka; dabagalka lafagurka kiimikada .

4) Haddii laga dhaliyo caddaynta qalab elegtronik ah ama mid gacmeed, marka la caddeeyo in qalabkaasi "xaalad shaqo oo caadi ah" ku sugan yahay , waxa loo arki doonaa, ilaa inta laga caddaynayo taa liddigeed, in uu ku sugnaa xaalad shaqo oo wanaagsan marka la fiiriyo xaaladda ay khusayso.

## QAYBTA VII
## ISWEYDAARSIGA XOGTA (INFORMATION SHARING)

### Qodobka 37aad: Is-waydaarisga Warka la Xidhiidha Kooxo Argagixiso iyo Falal Argagixiso.

1. Taliska Booliska Somaliland waxay, marka ay ka codsadaaan hay'adaha ay khusayso ee dal shisheeye, u bandhigi karaan masuuliyintaas, wixii war ah ee ay gacanta ku hayaan ama ay gacanta ku hayso laan kale oo dawladda ah ee la xidhiidha arrimahan soo socdoa-
   a) ficilada iyo dhaqdhaqaaqyada kooc argagaxiso ama qof looga shakiyey inuu ku lug leeyahay gelidda fal argagixiso ama dembi kale oo ku xusan xeerkan;
   b) is-ticmalka waraaqaha safarka oo la been abuuray ama la foojariyeeyey ee qof looga shakiyey in uu galay fal argagixiso ama dembi kale oo lagu sheegay xeerkan;
   c) inuu u gudbiyo aalado qarxa ama olola ama ashyaa xaasaasi u ah koox aragagixiso ama qof looga shakiyey in uu la lug leeyahay gelidda fal argagixiso ama dembi lagu sheegay xeerkan;
   d) is-ticmalka tiknoolajiyadda isgaadhsiineed ee kooxaha argagixiso;

Hadii aan soo bandhigidaas aanu mamnuucin qodob sharci ama aanay ula muuqan Booliska mid khatar ku ah amniga qaranka ama badbaadada dadwaynaha Jamhuuriyada Somaliland.

## QAYBTA VIII
## SOO BANDHIGIDDA IYO WADAAGGA WARKA
## (DISCLOSURE AND SHARING OF INFORMATION)

### Qodobka 38aad: Waajibaadka in la Soo Bandhigo Warka la Xidhiidha Dembiyada iyo Falalka Argagixiso

1. qof kasta oo haya war, warkaasoo caawin kara;

(a) ka hortagga fulin qof kale fal argagixiso,

(b) soo xidhiidda ama dacwad ku soo oogidda qof kale dembi ku cad xeerkan waa in uu u gudbiyaa warkaas Boolliiska.
2. iyada oo aan waxba loo dhimayn farqada (1) ee qodobkan waxa uu dalbayaa soo bandhigidda warkasta oo mudan ilaalin.
3. laguma soo oogi karo dacwad madani ah iyo mid ciqaab midna qof u soo bandhigay war si niyad sami ah, si waafaqsan farqadda (1) ee qodobkan.
4. qof kasta oo raaci waya farqadda (1) ee qodobkan waxa uu gelayaa dembi, waxaana lagu ciqaabayaa xadhig u dhaxeeya 2 sano ilaa 5 sano oo xadhig ah.

**Qodobka 39[aad]: Waajibka in la Soo Bandhigo War la Xidhiidha Hanti Koox Argagixiso ama Hanti loo Isticmaalay Gelidda Dembi ku Xusan Xeerkan.**

1. qof kasta waa in uu u bandhigaa Booliiska;
(a) jiritaanka hanti uu gacanta ku hayo ama maamulo taas oo uu ogyahay in ay tahay hanti argagixiso, ama inay jiraan sababo macquul ah oo lagaga shakiyo inay tahay hanti aragagixiso;
(b) jiritaanka hanti uu gacanta ku hayo ama maamulo oo uu u hayo ama ay leedahay ama uga wakiil tahay mu'asasad tilmaaman iyadoo ay jiraan sababo macquul ah oo looga shakiyo inay leedahay ama loo maamulo mu'asasad tilmaaman;
(c) war kasta oo la xidhiidha macaamilaad hanti argagixisi; ama
(d) war kasta oo la xidhiidha macaamilad ama soo jeedin macaamilad taas ay jirto sababo macquul ah oo looga shakiyo inay ku lug leedahay hanti argagixiso.

2. Bangiga Dhexe ee Somaliland, isaga oo qaadanaya doorkiisa Kormeer (regulator) ee laamaha maaliyadeed ee Somaliland, waa in ay ku jirtaa war-bixin xiliyeedada loo baahan yahay in Laan maaliyadeed ee kasta in ay xaqiijso in;
(a) aanay gacanta ku hayn ama maamulin hanti ay leedahay ama maamusho ama loo hayo koox aragagixiso; ama
(b) ay gacanta ku hayn ama maamusho hantidaas ayna bixiso taas ka dib ay bixiso faah-faahin cidda qofka, xisaabaad, iyo tacaamullka iyo wadarta qiimaha hantida ??????????

3. waxa dheer waxyaabaha looga baahan yahay ee ku xusan farqadda 2 [aad] ee Qodobkan, waa in Laan maaliyadeed kasta ay war-bixin ka siisaa Bangiga Dhexe ee Somaliland, macaamil kasta oo dhaca inta ay ku jiraan hawlahooda marka ay jirto sabab macquul ah oo lagag shakiyo in macaamilkaasi la xidhiidho gelidda fal aragagixisnimo.
4. qofna looguma soo oogi karo dacwad madani ah ama ciqaab ah in uu soo bandhigay war-bixin, uu si niyad sami ah u bixiyey, isaga oo raacaya farqadda 1[aad] ama 2 [aad] ee qodobkan.
5. qof kasta oo raaci waya farqadaha 1 [aad] ama 3 [aad] ee qodobkan waxa uu gelayaa dembi waxaana lagu ciqaabayaa xadhig inta u dhaxaysa 2 sano ilaa 5 ano.

## QAYBTA IX
## QABASHADA IYO LA WAREEGIDDA HANTI ARGAGIXISO

**Qodobka 40 [aad]: Awoodda la Wareegidda Hanti loo Isticmaalay Gelidda Falal Argagixiso**

1. Marka Ciidan Somaliland uu sababo macquul aha awgood uga shakiyo in hanti loo isticmaalay, ama loo isticmaalayo, ama loo isticmali karo in lagu fuliyo dembi ku xusan xeerkan, waa uu qaban karaa hantidaas.
2. Ciidanka Booliisku waxa uu isticmaali karaa awoodihiisa ku xusan farqadda 1 [aad] ee Qodobkan ha jirto ama yaanay jirin dacwad ciqaab ah oo la oogay lana xidhiidha hantidaasi.
3. ciidanka Boolisku, waa in uu sida ugu dhaqsaha badan ee suuragal ka ah marka uu qabto hantida kadib si waafaqsan farqadda (1) ee qodobkan, dhacdo kasta 14 maalmood gudahood, uu u sameeyaa codsi uu kaga dalbanaayo Maxkamadda Gobolka haynta (xayiraada) hantidaas, isagoo sii marinaya xafiiska Xeer ilaalinta Guud .
4. Garsooraha codsiga loogu qortay si waafaqsan farqadda (3) ee qodobkan, waa in aanu samayn amar hayn oo la xidhiidha hantida lagu sheegay codsiga hadii-
(a) aanu siinin fursad macquul ah oo lagu dhegaysto qof kasta oo lagu ogyahay in uu leeyahay ama maamul hantida;
(b) aanu hayn sababo macquul ah oo lagu aamino in hantidaas loo isticmaalay, loo isticmaalyo ama loo isticmali karo in lagu galo dembi ku xusan xeerkan.
5. iyada oo hoos imanay farqadda (6) ee qodobkan, amar kasta oo hayn oo lagu sameeyey si waafaqsan farqadda (4) ee qodobkan wuxuu soconayaa mudo dhan 60 maalmood, waxana codsi kadib Maxkamadda Gobolku dib ugu cusboonay siin kartaa 60 maalmood oo kale ilaa laga gaadhayo waqtiga hantida amarka lagu sheegay la horkeenayo dhegaysiga dacwadda ee dembiga lagu sheegay xeerkan ee la xidhiidha hantidaas
6. Garsoore Maxkamadda Gobolku waxaa uu siidayn karaa hanti lagu hayey amar hayn oo lagu sameeyey si waafaqsan farqadda 93 ee qodobkan haddii;
(a) aanu hayn sababo macquul ah oo uu kaga shakiyo in hantidan loo isticmaalay, loo isticmaalayo, ama loo isticmali doono in lagu galo dembi uu dhigay xeerkani; ama
(b) aanay jirin wax dacwad ah oo laga oogay Maxkamada Gobolka dembi ku xusan xeerkan oo la xidhiidha hantidan muddo 6 bilood gudahood, laga bilaabo taarikhda la soo saaray amarka hantidaas.
7. dacwad ciqaaba ah ama madani ah laguma soo oogi karo Ciidanka Booliiska qabashada hanti, oo ay u sameeyeen si niyad sami, si waafaqsan farqadda (1) ee qodobkan.

## Qodobka 41[aad]: Amarada la Wareegidda Hanti Marka Lagu Helo Dembiyada ku Xusan Xeerkan

1. marka qof lagu helo dembi ku xusan xeerkan, ama dembi xeer kale fal argagixiso, maxkamaddu waxay amri kartaa in hanti kasta oo loo isticmaalay, ama xidhiidh la lahayd; ama laga helay gelidda dembiga, in qaranku la wareego.
2. Hanti loo wareejiyay Qaranka sida ku cad farqadda (1) ee qodobkan waa in uu iska lahaadaa qaranku;
(a) hadii aan rafcaan laga qaadan amarkaas, xilliga rafcaan qaadashada;
(b) hadii rafcaan laga qaatay amarkaas, oo go’aanka dambe uu dhigaayo in lala wareego.

## Qodobka 42[aad]: Amarada Qabashada iyo Xayiraada Hanti

1. marka garsooraha Maxkamadda Gobolka uu ku qanacdo, isaga oo eegaya codsiga

maxkamadda fadhi uu ugu soo jeediyey Xeer-ilaaliyaha, in ay jirto sababo macquul ah oo looga shakiyo inay ku jirto dhisme, meel, ama markab hanti nooca ay doonto ha ahaatee, in hantidaaas amar la wareegid lagu sameyn karo, si waafaqsan qodobka hore ee Xeerkan, Garsooruhu waxa uu soo saari karaa;

a) amar (waaran) oo u ogolaanaya Booliiska inay ka baadhaan, dhisme, meel, ama Markab, hantidaas oo soo qabtaan hadii laga helo, iyo hantidii kale ee Booliiska ula muuqata, iyadoo sababo macquuli jiraan, in amar la wareegid lagu samayn karo.

(b) amar joojin oo ka mamnuucaya qofna inuu soo bandhigo, ama si kale ula macaamilo isagoo dan ka leh, hanitdas, oo aan ahayn sida lagu tilamaamay amarka.

2. codsi loo sameeyey si waafaqsan farqada (1) ee qodobkan kadib, garsooruhu waxa uu, codsiga Xeer-ilaaliyaha Guud ka dib, iyo hadii ay garsooraha ula muuqato in duruuftu sidas rabto-

(a) u magacaabi karaa qof inuu maamulo, maareeyo ama hayo, guud ahaan ama qayb ahaan hantida, si waafaqsan tilmaamaha garsooraha;

(b) wuu ka dooni karaa qof gacanta ku haya hantidu inuu u gacan u geliyo hantidaaas qofka loo magacaabay si waafaqasan farqada hore.

3. amarka maamulka ee xusan farqadda (2) ee qodobkan wuu joogsanayaa dhaqangalkiisu marka hantida lagu maamulayo amarka lagu soo celiyo codsadaha si waafaqsan xeerka ama Dawladu la wareegto.

4. Xeer-ilaaliyaha Guud waxa uu mar kasta ka codsan karaa Garsooraha Maxkamadda Gobolka inuu tirtiro, bedelo, waaran ama amar uu ku soo saaray si waafaqsan qodobkan.

**Qodobka 43[aad]: Amaradda la Wareegidda hanti.**

1. Xeer-ilaaliyaha Guud waxa uu u gudbin karaa codsi Garsoore Maxkamadda Gobolka ah si uu u soo saaro amar la wareegid hanti argagixiso.

2. Xeer-ilaaliyaha Guud waa in uu ku sheegaa codsigiisa waafaqsan faqrada (1) ee Qodobkan dadka lagu ogyahay inay leeyihiin ama maamulaan hantida, keliya waana in la ogaysiiyaa codsiga dacwaysanaha lagu magacaabay codsiga hadba sidii garsooruhu tilmaamo.

3. hadii garsooruhu uu ku qanco caddeymo kadib in hantida codsiga laga soo gudbiyay ay tahay hanti argagixiso, garsooruhu waa in uu amraa in hantidaas loo wareejiyo qaranka.

4. hadii garsooruhu diido codsiga ku cad farqadda (1) ee qodobkan, garsooruhu waa in uu soo saaraa amar qeexaya in hantidaasi ahayd mid argagixiso.

5. hadii Maxkamadda Rafcaanku ku qanacdo in qofka lagu sheegay farqadda (5) ee qodobkani-

(a) uu danweyn ka leeyahay hantida codsiga laga oo sameeyey,

(b) uu si taxadar macquul ah ku jira u hubiyo in hantidaas loo wadin fal argagixiso, loo isticmaalin in lagu galo ama lagu fududeeyo gelidda fal argagixiso isla markaana aanayna isticmaalin koox argagixiso;

(c) aanu xubin ka ahayn koox argagixiso,

Maxkamaddu waa in ay amartaa in danta qofkaas oo keliya aanu saamayn amarku. Amarku waa in uu sidoo kale ku dhawaaqaa dabciga iyo xadiga danti su’aashu ka taagan tahay

## QAYBTA X
## URURADA AAN DAWLIGA HAYN IYO KUWA SAMO-FALKA

**Qodobka 44aad: Diidmada Codsiga Diiwaan-gelinta, ka Noqoshada Diiwan gelinta ee Urur Aan Dawli ahayn ama Samo-fal ah oo Ku Xidhan Kooxo Aragagixiso**

1. marka ay jirto war, ay ku jirto warbixino amaan ama xuuraan ciqaabeed, kaas oo muujinaya sababo macquul ah in codsade diiwaan gelin ama urur la diiwaan-geliyaya uu sameeyey, uu samaynayo, ama ay u badan tahay inuu ka dhigo wax ay ka heli karaan, khayraad kasta, si toos ah ama si dadban, koox argagixiso:
(a) Wasiirka Qorshaynta iyo Horumarka Qaranku, isaga oo la tashaday Wasiirka Arimaha Gudaha, waxa uu , marka uu yahay urur aan dawli ahayn, diidi karaa diiwaan-gelinteeda si waafaqasan qodobka 31 of the Xeerka Ururda Samafalaka ee aan Dawliga Aheyn (Law No. 43/2010) ama marka uu yahay urur aan dawli ahayn oo la diiwaan-geliyey waxa uu saxeexi karaa shahaado uu kaga noqonayo diiwan gelinta ururkaas si waafaqsan qodobka 41 ee isla xeerkaas.
(b) Wasiirka Arimaha Guduhu waxa uu, marka uu yahay urur kale oo aan dawli ahayn, isu-tagaan fa'iido doon ahayn, ha ahaado mid shaqsiyad leh ama yuu noqone, soo saari karaa shahaado uu kaga noqonayo diiwaan-gelintaas ama, hadii aan la diiwaan gelin, waxa uu soo saari karaa amar uu ku baabinayo isu-tagaas (association).
2. nuqul ka mid ah shahaadada la saxeexay ama amarka lagu sheegay farqadda (1) ee qodobkan waa in la gaadhsiiyaa codsadaha ama ururka ama isu-tagga, shaqsi ahana ama waraaq la diiwana-geliyey oo loo diro meeshii lagu ogaa, iyada oo ay la socota shahaadada ama amarka.
3. shahaadada ama amarka kasta oo ka dhasha dib looma eegi karo ama lama joojin karo, mamnuuci karo, tirtiri karo, lama baabi'in karo ama si uun kale loolama macaamilli karo oo aan ahayn sida ku cad qodobkan.
4. sodon (30) maalmood gudohood taariikhda shahaadada ama amarka ee ku cad farqadda (1) ee qodobkan, codsadaha ama ururka ama isu-tagga waxa uu u samayn karaa codsi Maxkamadda Sare si ay dib-ugu eegto go'anka kama dambeysta ah ee Wasiirka.
5. marka la soo xareeyo codsiga ku cad farqada (4) ee qodobkan, Maxkamadda Sare waa in-
(a) ay ku baadhaa fadhi, warka, oo ay ku jirto war-bixin amaan ama xuuraan ciqaabeed, ee uu tixgeliyay Wasiirku ka hor inta aanu samayn shahaadada ama amarka waxayna dhegaysanay wixii cadayn ah ama war ah ee loo soo bandhigo iyada oo la metelayo Wasiirka (ha ahaado warkaasi mid maxkamadi aqbali karto ama yuu noqone), waxayna, markuu codsado Wasiirku ka dib, dhegaysan kartaa dhamaan ama qayb ka mid ah cadayntaas ama warkaas iyada oo uu maqan yahay codsaduhu ama ururka ama isu-taggu ama qareenka metelaya codsadaha ama ururka ama isu-tagga, hadii Maxkamaddu ay u aragto in soo-bandhigidda warku uu khatar ku yahay amniga qaranka ama uu khatar gelinayo bedqabka qof. .

(b) ay siiso codsadaha ama ururka ama isu-tagga hadal koobaya warka ay hayso Maxkmadu si ay usiiso ogaysiin macquul ah oo ku saabsan duruufaha dhaliyay shahaadada ama amarka, iyada oo aan la soo bandhigayn warka soo bandhigidiisu ay khatar ku tahay amniga qaranka ama khatar ku tahay badbaadada qof

(c) ay siiso cadsadaha ururka ama isu-tagga fursad macquul ah oo lagu maqlo

(d) ay go'aamiso in shahaadadu ay macquul tahay marka la eego dhamaan warka ay hayso maxkamaddu, ama hadii aanay macquul ahayn ay tirtirto.

6. Go'aanka ay gaadho maxkamdda sare ee ku xusan farqadda (5) waa kama dambays lagamanna rafcaan qaadan karo.

7. hadii Maxkamaddu go'aamiso, sida ku cad farqadda (4). In shahaadadu ama amarku uu yahay macquul, Wasiirku waa in uu ku soo saaraa shahaadadaas ama amarkaas Faafinta Rasmiga ah.

8. hadii ay Maxkamadu go'aamiso in shahaadadu ama amarku aanu ahayn macquul, Maxkamaddu waa in ay amartaa in la tixgeliyo codsiga diiwaan gelinta ama la sii wado diiwaanka ama hawlgalka ururka.

## QAYBTA XI
## AWOODA QUBANAHA AH

**Qodobka 45[aad]: Dekedadaha ama Xuduudaha kontoroolka.**

1. Hadii qofku uu joogo-
   - (a) Deked ama xaduuda kantaroolka Somaliland.
   - (b) Markab ama diyaarad dusheed taas oo joogta meel ka mid ah Somaliland, ha ka timaado gudaha ama dibada Somaliland.
   - (c) Sarkaal baadhayaa uu rumaysto in qof jooga dekedda ama xuduudka uu ku lug leeyahay soo gelidda ama ka bixidda Somaliland,

   Markab ama diyaarad dusheed oo jooga meel ka mid ah Somalilad, ha ka timaado gudaha Somaliland ama dibadeed, Sarkaalka baadhaya waxa uu isticmaalii karaa awoodda ku xusan qodobkan ha jirto ama yay jirin sabab macquul ah oo uga shakiyo qofkaas in uu galayo, diyaar-gareenayo ama fududeenayo fal argagixiso.    .

2. Qofka lagu waydiiyo su'aalo is waafaqsan qodobkan waa in-
   - (a) Uu siiya sarkaalka baadhaya warkasta oo uu hayo.
   - (b) Uu siiyaa sarkaalka baadhaya marka la waydiiyo baasabor sax ah kaas oo ay ku jirto sawir ama dhukumenti sheegay wuxuu yahay
   - (c) Ku dhawaaqaya in uu haysto dhukumetiga uu waydiiyo sarkaalka baadhayaa
   - (d) Uu siiyaa sarkaalka baadhaya waraaq kasta ee uu hayo ama nooc kasta ee Sarkaalka Baadhaya uu waydiiyo.
3. Qofka lagu xidho si waafaqsan qodobkan waa in lagu siidayo muddo aan ka badnayn 9 saacadood oo ka bilaabanta markii ay bilaabantay baadhistiisu, hadii aan lagu ahaynin amar kale.
4. Iyada oo ujeedadiisu tahay Sarkaalka in uu isku qanciyo in ay jiraan dad uu doonayo in uu waydiiyo su'aalo sida ku xusan farqadda 1aad, sarkaalka wax baadhaya waxa uu fatashi kara-

(a) Markab ama diyaarad
(b) Wax kasta oo saaran markab ama diyaarad
(c) Wax kasta oo uu sababo macquula uu ku aamino in uu saaran yahay ama la saari doono markab ama diyaarad.

5. Sarkaalka wax baadhaya ee su'alaha waydiiya qof iyada oo u jeedadu tahay in uu ka go'aan gaadho in qof uu ku lug leeyahay diyarinta, gelidda ama fududaynta fal argagixiso-
   (a) Waxaa uu baadhi karaa qofka
   (b) Waxa uu baadhi karaa wax kasta oo uu gacanta ku hayo kaasoo uu leeyahay qofka la baadhaya ama saaran diyaaradda ama markab ka
   (c) Waxaa uu baadhi karaa wax kasta oo uu gacanta ku hayo oo uu leeyahay qofka la baadhayaa ama uu sarkaalka wax baadhayaa uu aamino in la saaray ama la saarayo diyaaradda ama markabka
   (d) Waxa uu baadhi karaa gaadiid saaran markab ama diyaarad ama la saaray ama lasaari doono markab ama diyaarad .

6. Sarkaalka baadhayaa waxa uu fuuli karaa diyaarad ama markab ama wax uu geli karaa gaadiidka iyada oo ujeedadu tahay in uu ka go'aan gaadho in uu isticmaalo awoodaha ku xusan qodobkan

7. Sarkaalka wax baadhaya wax uu hayn karaa wax kasta oo loogu dhiibay si waafaqsan qodobka, ama shay kasta oo uu baadhay ama helay -
   (a) Isagoo u haynayo ujeedo baadhid mudo aan ka badnayn 7 maalmood oo ka bilaabmay maalinta uu haynta bilaabay
   (b) Marka uu aamino in loogu baahan yahay cadayn ahaan
   (c) Marka uu aamino in loogu baahan yahay arrin la xidhiidha go'aanka wasiirka Arimaha Gudaha ee ka saaridda qof dhulka Somaliland

8. Qodobkan gudihiisa -
   (a) Sarkaal baadhaya waxa loo la jeedaa
      i) Askari Boolis
      ii) Sarkaal laanta socdaalka
      iii) Sarkaal kastamada
   (b) Deked oo ay ku jirto garoon diyaaradeed. Goob waxa loola dhaqmaya inay tahay deked hadii sarkaalka baadhayaa uu aamino in qofkaasi u tegay si uu uga raaco ama uga dego dayuurad ama markab
   (c) Xadku waxa loola jeeda xuduuda jamhuuriyadda Somaliland

9. Qofku waxa uu gelayaa dembi hadii uu isaga oo ku talo galsan uu joojiyo ama doono carqaladaynta baadhidda lagu dhigay qodobkan, waxaana lagu ciqaabayaa xadhig gaadhaya inta u dhaxaysa 1 ilaa 3 sano.

**Qodobka 46 aad: Awoodda soo Saaridda Xeer-nidaamiyayaal**

1. Madaxweynuhu waxa uu samayn karaa xeer-nidaamiyayaal dhamaan arrimaha u baahan xeer-nidaamiye fududeynaya kadib markuu sidaasi soo jeediyo Wasiirka Arrimaha Guduhu.

**Qodobka 47aad: Laalid**

1. Xeerka Ku saabsan Afduubida) – Law No.36 of 30 April 1975 –ayaa halkan lagu laalay.
2. qodob kasta oo ku jira xeer kale ama xeer-nidamiye oo aan la jaan qaadi karin qodobada Xeerkan waa la-laalay.

**Qodobka 48aad: Dhaqan gal**

Xeerkani waxa uu dhaqan gelayaa marka ay ansixiyaan Labada Gole ee Xeer-dejinta uuna saxeexo Madaxweyanaha Jamhuuriyadda Somaliland.

______________________________________

**The Chairman of the House of Representatives**

_____________________________________

**General Secretary of the House of Representatives**